

CPR iyo Gargaarka Degdegga ah Macluumaadka laysanka Bixiyeyaasha Daryeelka Ilmaha

Oggolaanshaha Tababarka iyo Xusuusinta Xaqiijinta



Macluumaadka hoose wuxuu u adeegaa sidii xasuusin ku saabsan waxa looga baahan yahay Xeerka Maamulka Washington (WAC) ee ku saabsan tababarka CPR. Macluumaadkani maahan wax cusub; si kastaba ha noqotee, waxaan rajeyneynaa inay kugu caawin doonto markii la go'aaminayo waxaad u baahan tahay inaad sameyso si aad u buuxiso shuruudaha WAC.

Ogolaanshaha Tababarka CPR

Kuwa soo socdaa waa inay codsadaan si loo hubiyo in tababarka CPR buuxiyeen iyo shuruudaha lagu qeexay WAC 110-300-0106 (11) oo ay aqbasho Waaxda Gobolka Washington ee Caruurta, dhalinyarada, iyo qoysaska (DCYF):

- Tababarka waxaa dhammaystiray macallin uu shahaado siiyay mid ka mid ah ururada hoos ku xusan:
 - Laanqayrta Cas ee Mareykanka
 - Badbaadada Mareykanka iyo Macadka Caafimaadka
 - Ururka Wadnaha ee Mareykanka
- Haddii uu tababarka dhammeystiro urur kale oo qaran ahaan la aqoonsan yahay, ururku waa in uu raaca hagaha tababarka ee mid ka mid ah ururada kor ku xusan
- Tababarku waa in lagu daraa ama iney kujirto tababar qayb gacmeed iyo bandhig macalin shahaado haysta hortiiisa.

Macluumaad dheeri ah oo ku saabsan WAC 110-300-0106 (11) Onlayn, Gal <https://app.leg.wa.gov/wac/default.aspx?cite=110-300-0106>.

DCYF waxay tixraacdaa Waaxda Shaqada iyo Warshadaha ee Gobolka Washington & Warshadaha (L&I), si ay u hagto waxa la aqbalayo ururada shahaado bixinta. Hadda, DCYF ma aqbasho tababarka macalimiin shahaado ka haysta hay'aaha aanan kor ku xusnayn. DCYF waxay cusboonaysiin doontaa WAC 110-300-0106 gudaha iyadoo la raacayo wixii isbeddelo ah ee L&I sameyn karto.

Iyada oo laga jawaabay cudurka faafa ee COVID-19, DCYF waxay hirgelisay wax ka beddel ku meel gaar ah oo ku saabsan shuruudaha tababarka, si loo hubiyo helitaanka iyo awoodda buuxinta shuruudaha inta lagu jiro amarka cudurka faafa. Wax ka badalida tababarka CPR waxaa laga heli karaa Bixiyeyaasha Daryeelka Ilmaha, Bogga Baahiyaha Tababarka ee bogga www.dcyf.wa.gov/services/early-learning-providers/qualifications/child-care-providers/training:

- Wax ka badalida tababarka ee ka jawaabida COVID-19 www.dcyf.wa.gov/sites/default/files/pdf/COVID-19-el-training.pdf
- Waxka Badalka Tobobarka Iyada Oo Laga Jawaabay COVID-19 www.dcyf.wa.gov/sites/default/files/pdf/COVID-19-el-training-sm.pdf

Xaqiijinta CPR

Raac tillaabooyinkan si aad u hubiso in tababarkaaga CPR la xaqiijiyey:

1. Si-aad u gasho tababarka ku saabsan diiwaankaaga xirfadeed ee gudaha
2. Sii mid ka mid ah waxyaabaha soo socda laysan-bixiyahaaga ama loo shaqeyaha, si loo xaqiijiyo dhammaystirka tababarkaaga:
 - Shahaadada Kaarka caddaynta
 - Shahaadada Warqadda baraha

La xiriir

Wixii su'aalo ah ee ku saabsan tan, fadlan la xiriir DCYF-kaaga shati bixiye. Waqtigaan, DCYF ma bixin doonto talooyin dheeri ah ama oggolaansho la oggolaan karo ururada shahaadooyinka.

Haddii aad jeclaan lahayd nuqulada dukumintiga qaab kale ama luqad, fadlan la xiriir Xiriirka Degmooyinka DCYF (1-800-723-4831 | 360-902-8060, ConstRelations@dcyf.wa.gov).

DCYF PUBLICATION EPS_0076SM (01-2022)



Washington State Department of
CHILDREN, YOUTH & FAMILIES